# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADA

# Wax ka-badalka iy kaabista xeerka Qareenada

# (Xeer L/r. 30/2004)

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

REF. JSL/M/XERM/249-2070/092013 DATE 28/09/13

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0361/092013

## Dhaqan-galka Wax Ka-Beddelka Xeerka Qareenada Xeer Lr. 30/2004

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-22/619/2013 ee ku taariikhaysan 10/09/2013 ee ay ku ansixiyeen Wax Ka-beddelka Xeerka Qareenada Somaliland Xeer Lr. 30/2004.

Wuxuu Soo Saaray

Dhaqan-galka Wax Ka-beddelka Xeerka Qareenada Somaliland Xeer Lr. 30/2004.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RL: 52 RECEIVED 30/09/2013

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**
**Head Quarter Hargeisa.**

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha Wakiilada**
**Xarunta Hargeysa.**

Ref: GW/G/KF-22/619/2013 Date : 10/09/2013

## Go'aanka Ansixinta Soo Jeedinta Wax Ka-Bedelka XEERKA QAREENADA SOMALILAND (Xeer Lr.30/2004)

**Markuu Arkay:-** **Qodobka 27aad, 28aad iyo 37aad 79aad** ee Dastuurka JSL oo si cad u qeexaya xuquuqda asaasiga ah ee dacwadda, xaqa is difaaca iyo xuquuqda gaarka ah ee u leeyahay qofka xorriyadda laga qaaday.

**Markuu ku Qancay:-** Baahida wayn ee loo qabo in la helo xeer nidaamiya gudashada waajibaadka Garyaqaanada iyo ku shaqaysiga mihnada qareenimo.

**Markuu Tixgaliyay:-** Go'aankii Ansixinta soo jeedinta Waxka-bedelka Xeerka Qareenada ee Golaha Wakiilada Tixraacisuna aha GW/G/KF-21/594/2013 kuna taarikhaysnaa 18/6/2013 iyo dhamaan Talooyinka ururka Qareenada, Wasiirka iyo masuuliinta Wasaaradda cadaalada

**Markuu Ogolaaday:-** Soo jeedinta Wax-ka-badalka Madaxweynaha ee Wax-ka-badalka **Xeerka Qareenada** ee Tixraaciisu yahay **JSL/M/SHG//081-1881/072013** ee kuna taariikheysan **06/07/2013**

**Markuu u Codeeyay:-** Ansixinta wax ka badalka Madaxweynaha ee wax ka badalaka **Xeerka Qareenada Fadhigii 9aad** ee **Kal-fadhiga 22aad** taariikhduna aheyd **02/09/2013** oo ay goob joog ahaayeen **(42)** Mudane oo ka mida ah mudanayaasha Golaha Wakiilada.

Website: www. Somalilandparliament.net

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah (**21 cod**) oo gacan taag ah ku ansixiyay soo jeedinta wax ka badalka Madaxweynaha ee wax ka badalka Xeerka Qareenada ee (Xeer **No. 30/2004**), halka ay ka diideen **(9)** Mudane, kana aamuseen **(13)** Mudane, **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

## ALLAA MAHAD LEH

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

**C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)**
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

GOLAHA WAKIILADA JAMHUURIYADA SOMALILAND

# ***GOLAHA WAKIILADA JSL***

**Markuu Arkay:-** **Qodobka 27aad** iyo **Qodobka 28aad** ee Dastruurka JSL.

**Markuu Darsay:-** Mashruuc-Sharciga Qareenada ee ay Xukuumaddu soo Gudbisay.

**Markuu ku Qancay:-** Baahida wayn ee loo qabo in la helo Xeer lagu maamulo adeegsiga xirfadda qareenimo.

**Markuu Tixgaliyay:-** Soo jeedimaha iyo talooyinkii ururka Qareenada Somaliland iyo Wasaarada Cadaaladda Jsl

## WUXUU SOO SAARAY

Wax Ka-Badalka Iyo Kaabista Xeerka Qareenada

(*Xeer L/r 30/2004)*

## QAYBTA I

### Qodobka 1aad

### Eray Bixin

**"Maxkamadda"** waxaa loola jeedaa Maxkamadaha darajada hoose iyo darajada sare ee dalka iyo Maxkamada Ciidamada ee JSL.
"**Maxkamada Hoose"** waxaa loola jeedaa Maxkamdaha Degmooyinka, Gobolada iyo Rafcaanka.
**"Maxkamada sare**" waxaa loola jeedaa Maxkamada Sare ee Jamhuuriyada Somaliland
**"Wasaarad"** waxaa loola jeedaa Wasaarada Cadaalada
**"Wasiirka**" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaarada Cadaalada
**"Qareen"** waxaa loola jeedaa Garyaqaan ka diiwaangashan Wasaarada Cadaalada oo ku shaqeeya Mihnada Qareenimo
**"Mihnada Qareenimada**" waxaa loola jeedaa ku shaqeysiga aqoonta sharciga, nidaaminta, Habeynta iyo ka doodista arrimaha sharciga
**"Igmad"** waxaa loola jeeda qofka u igmaday qareen inuu u fuliyo hawl sharciyeed
**"Qof**" waxaa loolaa jeedaa cidkasta oo leh qofnimo dabiiciya iyo qofnimo qaanuuniyah

**“Diiwaan qareen”** waxaa loola jeedaa diiwaanada lagu qoro laguna keydiyo magacyada iyo arrimaha la xidhiidha ee qareenada ruqsada ka haysta Wasaarada Cadaalada.
**“Ruqsad”** waxaa loola jeedaa Xeerka Wasiirka Wasaarada Cadaalada ku soo saaro ogolaanshaha ku shaqeysiga Mihnada qareenimo.
**“Guddi”** waxaa loola jeedaa Gudida Ruqsad bixinta iyo anshax marinta qareenada ee xeerkani tilmaamo
**“Laallis**” waxaa loola jeeda in la tirtiro ruqsada qareenimada gabi-ahaanba
**“Hakin”** waxaa loola jeedaa in ruqsada qareenimada wakhti cayiman laga joojiyo qareenka ku shaqeysigeeda
**“Urur”** waxaa loola jeedaa ururka qareenada ee sameystaan muwaadiniinta ku shaqeysta Mihnada qareenimada si waafaqsan.

# QEYBTA II

## RUQSADA IYO DIIWAANGELINTA QAREENADDA

## Qodobka 2aad

1. Qofna kuma shaqeysan karo mihnada qareenimo isagoon ruqsad ka haysan guddida ruqsad bixinta iyo anshax marinta qareenada ee xeerkani tilmaamayo.

2. ***Qofna lama siin karo ruqsadda Qareenimo haddii uu ka tirsanyahay Golayaasha Qaranka ee (Guurtida, Wakiilada iyo Xukuumadda) Golayaasha Deegaanka, Shaqaalaha Dawlada iyo Ciidamada.”***

## Qodobka 3aad

**1.** Qofka codsada ruqsadda qareenimo wuxuu codsigiisa ku soo hagaajinayaa Guddida Ruqsad Bixinta iyo Anshax Marinta isagoo ku soo lifaaqaya Cadeymaha Xirfadiisa aqooneed ee ku xusan Qodobada 6aad, 7aad iyo 8aad ee Xeerkan.

**2.** Codsaduhu waa inuu bixiyaa khidmada is-diiwaangalinta imtixaanka qareenada.

**3.** Hadii Guddidu ku qanacdo in codsaduhu buuxiyay shuruudaha waxay ka qaadayaan imtixaan la xidhiidha Mihnada Qareenimo mudo 21 cisho gudohood ah, waxayna natiijada imtixaanka u gudbinayaan Wasaarada Cadaalada mudo 7 cisho gudohood ah.

**4.** Hadii guddidu u aragto inaanu buuxin codsaduhu shuruudaha imtixaanka waxaa loo celinayaa Codsigiisa.

## Qodobka 4$^{aad}$

**1.** Hadii Codsadduhu ka gudbi waayo Imtixaanka Guddiga codsi labaad ma soo qoran karo mudo hal sano gudahood , khidmadii is-diiwaangalinta imtixaanka looma celinayo.

**2.** Wasiirka wasaaradda cadaaladdu marku helo natijada imtixaanka wuxuu ku soo saarayaa ogolanshaha ruqsad qareenimo xeer wasiir ugu badnaan 14 cisho gudahood.

**3.** Qareenka waxaa ku waajib ah inuu bixiyo cashuurta ruqsadda qareenimada (issuance of license fee) iyo cashuuraha kale ee xeerku waajibiyay,waxana lagu kaydinayaa diiwaanka qareenadda.

## Qodobka5$^{aad}$

## Noocyada Ruqsadaha Qareenimada

Riqsadaha qareenimadu waxay u qaybsamayaan sadex nooc oo kala ah:

**b)** Ruqsada Qareen Guuud
**t)** Ruqsada Qareen Ciqaabeed
**j)** Ruqsada Qareen Shareeco

## Qodobka 6$^{aad}$

## Ruqsada Qareen Guud

Ruqsadda Qareen Guud waxaa la siinayaa qofka buuxiyay shuruudahan:-

**b)** Waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay
**t)** Waa in aan dadiisu 25 sano ka yarayn.
**j)** Waa inuu maskaxda ka fayow yahay
**x)** Waa in aanu hore ugu dhicin xukun ciqaabed oo kala dan bays ah oo maxkamadd hortooda kaga cadaatay 5sano ee udan baysay.

**Kh)** Waa inuu haystaa shahaado Jaamacadeed ama mid sharci oo dalka laga aqoonsanyahay ama waa inuu Garsoore kaga soo shaqayeeyey Maxakamad Gobol, Rafcaan ama Maxkamad sare muddo aan ka yarayn shan sano

## **Qodobka 7aad**
## **Ruqsada Qareen Ciqaabeed**

Ruqsada qareen dacwad ciqaabeed waxaa la siinayaa qofka buuxiya shuruudahan:-

**b)** Waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay
**t)** Waa in aanay da'diisu ka yarayn 25 sano
**j)** Waa inuu maskax ahaan fayaw yahay
**x)** Waa in aanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo kama danbays ah oo maxkamad horteeda kaga cadaaday 5 sanno ee u dambeysay
**Kh)** Waa inuu ku soo shaqeeyey Xeer ilaaliye, Dooda ama Qareen maxkamad Ciidan muddo aan ka yarayn 5 sano
**d)** Waa inuu ka gudbaa imtixaanka guddida

## **Qodobka 8aad**
## **Ruqsad Qareen shareeco**

Ruqsad qareen shareeco waxaa la siinayaa qofka buuxiya shuruudahan:-

**b)** Waa inuu yahay muwaadin u dhashay Somaliland
**t)** Waa in aan da'diisu ka yarayn 25 sano
**j)** Waa inuu maskaxda ka fayawyahay
**x)** Waa in aanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo kama danbays ah oo maxkamad horteed kaga cadaaday shantii sanno ee u dambaysay
**Kh)** Waa inuu haystaa shahaado jaamacad shareeco oo la aqoonsan yahay ama aqoon u dhiganta ama ku soo shaqeeyey garsoore Maxkamad Degmo.
**d)** Waa inuu ka gudbaa imtixaanka guddiga.

## **Qodobka 9aad**

Garyaqaan haysta shahaado jaamacadeed ee sharci kuna soo shaqeeyey muddo aan ka yarayn shan sano Xeer ilaaliye guud, Garsoore Maxkamad Sare, Maxkamad Rafcaan ama Barre jaamacad sharci ee soo codsada mihnada Qareenimo loogama baahna inuu galo imtixaanka ku xusan qodobka 4aad ee Xeerkan, waxaana toos loo siinayaa ruqsad qareen guud.

## **Qodobka 10aad**
## **Xadka Ruqsadaha Qareenada**

1. Qareenka Guud waxaa u banaan inuu galo dhamaan dacwadaha kala duwan ee darajo kasta oo maxkamadeed.

2. Qareen ciqaabeed, wuxuu gali karaa dacwadaha ciqaabta ee dhamaan darajooyinka Maxkamadaha.
3. Qareen Shareeco, wuxuu gali karaan dacwadaha shareecada iyo Racfaankooda.
4. Ma banaana Qareen inuu gallo dacwad ka dacwad ka duwan tau u ruqsada u haysto.

## Qodobka 11aad
## Cusboonaysiinta Ruqsada Qareennimo

1. Liisanka ruqsada qareenimo waxaa la cusboonaysiinayaa sanadkasta bilowgiisa.
2. Qareenku wuxuu ku bixinayaa cashuurta cusboonaysiinta Wasaarada Maaliyada, ka dibna wuxuu juwanka lacag bixinta la imanayaa Wasaarada Cadaalada si ruqsadiisa loogu cusoonaysiiyo.

## Qodobka 12aad
## Soo celinta Ruqsada Qareenimo

1. Qareen kastaa wuxuu Wasaarada ugu soo celinayaa ruqsadiisa si kumeel gaadh ah ama rasmi ah hadii uu galayo hawl aan la socon Karin ku shaqaysiga mihnadiisa qareenimo.
2. Qareenka ku soo celiya ruqsada si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan dib ayuu ka qaadanayaa ruqsadiisa markay ka dhamaato hawshii uu u soo celiyay.

## Qodobka 13aad
## Anshaxmarinta

Talaabooyinka anshaxmarinta ee soo socda waxaa awood u leh Guddiga ruqsad bixinta

- **b)** In digniin qoraal ah la siiyo
- **t)** In la saaro ganaax aan ka badnayn 3,000,000SL.Sh ah
- **j)** In laga hakiyo ruqsada muddo aan ka badnayn 1 sano
- **x)** In laga laalo ruqsada gabi ahaan.

## Qodobka 14aad
## Hakinta iyo laalista Ruqsada Qareenimo

1. Ruqsad qareenimo waxaa lagu laali karaa sababahan awgood:-
   - **b)** Marka ay burto shuruud ka mid ah shuruudihii lagu siiyey

**t)** Markay cadaato inuu ruqsada ku helay khiyaamo ama been abuur

**j)** Markay cadaato inuu ruqsada ku shaqeystay iyadoo laga hakiyey.

**x) Markay caddaato inuu qareenku garsoore laaluush siiyey ama isagoo dhinac ka soo jeeda laalush ka qaatay.**

Ruqsad qareenimo waxaa lagu hakin karaa sababahan awgood:-

**b)** Haday cadaato inuu galay dacwad aan ahayn kuwii ruqsada loo siiyey.

**t)** Hadii ruqsada cusboonaysiin waayo muddo 2 sanno ah, ama uu si hufan isaga bixin waayo cashuurta ku waajibtay.

**j)** Anshax-marinta xeerkani tilmaamayo waxaa ka go'aan qaadanaya guddiga, haddii aanu fal dambiyeed culus ahayn, kaas oo ay waajib tahay in guddigu u gudbiyo hay'addaha sharciga si loo horgeeyo maxkamadda awooda u leh.

## Qodobka 15aad
## Awooda Wasaarada Cadaalada

1. Waxay Wasaraddu awood u leedahay cusboonaysinta ruqsada Qareenada.
2. Qaadashada ruqsadu waxay waajibtaa hal mar waxaana qareenka ku waajib ah inuu cashuurto ruqsadiisa sanad walba.

## Qodobka 16aad
## Guddiga Ruqsad-bixinta & anshax-marinta Qareenada

1. Guddidu waxay ka koobnaanayaan toddoba xubnood oo kala ah:

    b. Laba xubnood oo ay soo magacaabayaan ururka qareenadu labadii sanaba mar.

    t. Laba xubnood oo uu soo magacaabayo Wasiirka Wasaaraddaa Cadaaladu oo uu midkood yahay Agaasimaha Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda kuwaasoo labadii sanaba mar la soo magacaabayo.

    j. Laba xubnood oo ka kala imanaya labada Gole ee Baarlamaanka (Wakiilada, Guurtida), oo ay soo magacaabayaan shirguddoonada labada gole labadii sanaba mar.

    x. Hal garsoore oo ka tirsan Maxkamada Sare oo uu soo magacaabyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare labadii sanaba mar.

2. Muddada xilkoodu waa laba sannaddood

3. Qofna laba jeer wax ka badan looma soo magacaabi karo xubinimada guddida
4. Magacaabista guddidu waa in ay ku soo dhamaato muddo aan ka badnayn 15 Maalmood maalinta faafinta rasmiga ah Xeerka lagu soo saaro
5. Fadhiga 1aad ee Guddida waxa isugu yeedhaya Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda muddo aan ka badnayn bil guddaheed oo ka bilaabanta maalinta la soo dhammaystiro magacaabista, waxaana guddoominaya fadhigaas xubinta ugu da'da wayn xubnaha guddida.
6. Guddoomiyaha guddida waxa fadhiga 1aad iska dhex dooranaya xubnaha guddida waxanu noqonayaa xubin ka mid ah xubnaha Qareenadu soo magacaabaan.
7. Xoghayaha guddidu wuxuu ahaanayaa Agaasimaha Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda.
8. Guddidani waxay soo saarayaan xeernidaamiye lagu dhaqangeliyo xeerkan, waxay kale oo samaysanayaan xeer hoosaad ay ku maamulaan shaqadooda.
9. Go'aamada guddigu waxay ku meelmarayaan cod hal dheeri ah.
10. Shirarka guddiga waxaa isugu yeedhi kara Guddoomiyaha ama ugu yaraan 3 [saddex] xubnood oo ka tirsan xubnaha guddiga.
11. Guddigu waxay ku hawl geli doonaan Xarun u gaar ah.
12. Guddigu waxay yeelanaysaa kharash hawleed looga qoondeeyo Miisaaniyadda Qaranka iyadoo Guddigu kharshkeeda u madaxbannaan tahay.
13. Guddigu wuxuu yeelanayaa shaqaale marba inta baahidoodu tahay dhaqaalohooduna u samaaxo.

## Qodobka 17aad
## Hawlaha & Wajibaadka Guddiga

1. ***Bixinta ruqsadaha qareenimad.***
2. Inay darsaan, baadhaan, hubiyaan eedaymaha lagusoo oogo qareenada.
3. Inay go'aanadooda anshax-marinta qareenada ay ka gaadhaan u gudbiyaan wasiirka cadaaladda.

## Qodobka 18aad
## Xilka & Waajibaadka Qareenada

1. Waxaa ku waajiba fulinta iyo ku dhaqanka shuruucda dalka, Xeerkan iyo tilmaamaha lagu fulinayo (regulation & Provision).
2. Inuu si daacadnimo iyo xilkasnimo ah ugu shaqeeyo aqoontiisa uguna adeego igmadihiisa.
3. Inuu si hufan u bixiyo khidmada iyo cashuurta sharciga ku waajibtay.

## Qodobka 19aad
## Xushmada Qareenka

1. Qareenku wuxuu ka qaadanayaa adeegyada sharci xushmad ku salaysan hadba heshiiska dhexmara igmadaha iyo qareenka.
2. Heshiiska igmadaha iyo Qareenka waa inay ku cadyihiin magaca Qareenka oo Buuxa, nooca dacwadda iyo xushmadda.
3. Heshiiska ku tilmaaman faqrada hore, waa in laga diiwaan geliyo kolba Maxkamadda dacwaddu khusayso .

## Qodobka 20aad
## Xuquuqda & Dhawrsanaanta Qareenka

1. Xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinimo ka sokow, wuxuu qareenku yeelanayaa xuquuqda muhiimada qareennimo.
2. Wareenka lama xidhi karo, lamina xayiri karo hadii hadii aan lagu qaban denbi culus isagoo faraha kula jira (Flagrance) ama aan ogolaansho laga helin Guddiga ruqsad bixinta iyo anshax marinta qareenadda.
3. Lama baadhi karo, lamina xayiri karo xafiiskiisa, Gurigiisa, Qoraaladiisa & Xidhiidhkiisa isgaadhsiineed, hadii aan amar sababaysan laga helin Garsooraha gacanta ku haya Dacwada la xidhiidha arinta la baadhayo.

## Qodobka 21aad
## Qareenada Shisheeye

Iyadoo la tixgelinayo shuruudaha Xeerkani qeexaayo, Dacwadaha ay dhinac ka yihiin dad ajanebi ah, qareeno shisheeye way uga doodi karaan Maxkamadaha Somaliland hortooda, oggolaanshahana waxa siinaya Wasaarada Cadaaladda.

## Qodobka 22aad
## Xeernidaamiye

"Guddidu waxay soo saarayaan xeer nimaadiye lagu dhaqan galinaayo xeerkan oo aan ka hor imanayn qodobada xeerkan, waxaa kale oo ay soo saarayaan xeerhosaad lagu maamulayo xil gudashadooda.

## Qodobka 23aad
## Laalis

1. Waxaa la buriyey dhamaan Xeerkasta oo ka hor imanaya ama aan la socon Karin Xeerkan.
2. Marka Xeerkani dhaqangalo waxa buraya dhamaan ruqsadihii qareenimo ee hore u jirey.

## Qodobka 24aad
## Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka labada Gole ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Gudoomiyahah Golaha Wakiilada JSL